

Ka waran daryeelka ilkaha?

- Daryeelka ilkaha waa qayb ka mid ah Medical Assistance.
- İlkaha waa in la baadha 6 bilood kasta
- Inaad bilowdo baadhitaanada ilkaha marka iligga ugu horreeya soo baxo
- Qorshahaaga caafimaadka ama shaqaalaha C&TC waxay kaa caawin karaan inaad hesho dhaktar ilko oo aqbala caymiskaaga



Xaggee ka heli karaa macluumaad dheerad ah?

Fadlan booqo webseedka anokacountymn.gov/ctc si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku sabsan:

- Rugaha caafimaadka iyo kheyraadka daryeelka caafimaadka iyo ilkaha
- Macluumaadka qorshaha caafimaadka iyo xiriiriyeyaasha barnaamijyada abaalmarinta
- Macluumaadka kheyraadka bulshada
- Macluumaad ku qoran luqado kale



Waan la shaqeynaa dadka si aan u horumarino noloshooda

Anoka County
Public Health & Environmental Services
2100 3rd Avenue, STE 600
Anoka, Minnesota 55303-5041



Anoka County
MINNESOTA

Respectful, Innovative, Fiscally Responsible

Updated 08/18/25

Baaritaanka Carruurta iyo Dhalinyarada

ANOKA COUNTY



Waa faa'iido loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 0 - 20.

**Child and Teen
Checkups**

📞 763-324-4280

📞 763-200-4385

Waa Maxay Barnaamijka Baaritaanka Carruurta iyo Dhalinyarada (C&TC)?

Carruurta iyo dhalinyarada haysta Barnaamijka Caafimaadka (Medical Assistance) si toos ah ayay qayb uga yihiin barnaamijka C&TC laga bilaabo marka ay dhashaan ilaa ay gaaraan 21 sano.

Barnaamijkan C&TC wuxuu ka kooban yahay bararitaanno bilash ah. Reerkaaga sidoo kale wuxuu heli karaa caawimaad si aad u heshaan dhakhaatiirta, dhakhaatiirta ilkaha, iyo adeeyada bulshada.

Carrurteydu ma xanuunsana. Maxay ugu baahan yihiin inay u tagaan baritaanno caafimaad?

Barritaannada joogtada ah waxay ka caawiyaan carruurta inay caafimaad qabaan iyadoo:

- Si hore looga helo dhibaatooyinka caafimaad
- Lagu dhiirrigeliyo caadooyin caafimaad leh
- Lagu siiyo waqti aad ku weydiiso su'aalo la xiriira caafimaadka iyo koritaanka ilmahaaga

Baaritannada C&TC sidoo kale waa fursad fiican oo lagu dhammeeyo foomamka looga talagalay barnaamijyada sida Head Start, iskuulka, ciyaaraha, day care, ama WIC.



Maxa ka mid ah baaritaanka Carruurta iyo Dhalinyarada (C&TC)

Qaybaha baaritaanka C&TC waxay ku xiran yihiin da'da ilmahaaga, badanaa waxaa ka mid ah:

- Cabbirada (dherer, miisaan, cadaadiska dhiigga)
- Hubinta aragga iyo maqalka
- Baaritaan jir ahaaneed
- Qiimeyn horumarka ilmaha
- Taariikh caafimaad
- Caafimaadka ilkaha
- Wacyigelin ku saabsan nolol caafimaad leh
- Caafimaadka maskaxda
- Tallaalada iyo baaritaanno shaybaar

Baaritaanka C&TC oo dhameystiran wuxuu ka kooban yahay dhammaan waxyaabahan iyo wax intaas ka badan!

Goorma ayaa baaritaannadu dhacaan?

0-1 Bilood	12 Bilood
2 Bilood	15 Bilood
4 Bilood	18 Bilood
6 Bilood	24 Bilood
9 Bilood	30 Bilood

Sanad kasta 3 ilaa 20 jir.

Sidee baan ballan u samayn karaa?

Ballan samayntu way fududahay. Wac dhakhtarka ilmahaaga iyo samee ballan.

Ka waran haddi aan u baahdo caawin?

Haddi aad u baahan tahay caawimaad si aad

- U hesho xarumo caafimaad
- Ballan sameyso
- Gaadi ku geeya ballamaha dhakhtarka

Wac qorshahaaga caafimaad ama rugta caafimaadka.

Blue Plus	1-800-711-9862
HealthPartners	952-967-7998
Medica	1-800-373-8335
UCare	612-676-3200

Minnesota Health Care651-297-3862
Consumer Support (fee-for-service/straight MA)

Anoka County C&TC.....763-324-4280
or text 763-200-4385

Qorshayaasha caafimaad waxay sidoo kale bixin karaan abaalmarino daryeelka ka hortagga ah iyo faa'iidooyin kale. Wac qorshahaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Ka waran haddii aan u guuro gobol kale?

Barnaamijka C&TC wuxuu ka jiraa gobol kasta oo Minnesota ah. Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah barnaamijyada C&TC ee gobollada deegaanka.

Carver	952-361-1329
Dakota	952-891-7500
Hennepin	612-348-5131
Ramsey	651-266-2420
Scott	952-496-8587
Washington	651-430-6750